# WARSIDAHA AGA

## AGA NEWSLETTER

**WAA WARSIDE-XILLIYEED KU HADLA CODKA AKADEEMIYE-GOBOLEEDKA AFSOOMAALIGA (AGA)**
*A PERIODICAL NEWSLETTER PUBLISHED BY THE INTERGOVERNMENTAL ACADEMY OF SOMALI LANGUAGE*

**TIRSIGA 3AAD, SANNADKA 1AAD, LUULYO– SEBTEMBAR 2018**
**KU BEEGAN MUNAASABADDA SANNAD-GUURADA SHANAAD EE AGA**

**HADAFKAYAGU WAA HIILKA AFKA HOOYO IYO HAL-ABUURKIISA**

## Tusmada Tirsigan

**EREYGA TIFAFTIRKA**
**AGA oo Shan Jirsatay**

**QORMOOYIN HORTABIN MUDAN**
Waraysi Isuduwaha Laamaha AGA ee Qaaradda Yurub , Abtidoon
Barashada iyo Baridda Af Soomaaliga Soomaaliya: Dadaal kala Dhantaalan!

**WARARKA WAXQABADKA AGA**
Xuska Maalinta Caalamiga ah ee Buugga – Muqdisho.
Maalinta Buugga iyo Xuquuqda Hal`abuurka – Jabuuti.
Dufcaddii Saddexaad ee Tababarka Habaynta Qoraalka.

**WARAR KALE OO XUSID MUDAN**
Bandhigyada Buugaagta Sannadlaha ee Kismaayo,Garoowe iyo Hargeysa

**KORORSO AQOONTA AFKAAGA IYO HAL-ABUURKIISA**
Wadaraynta Magacyada Af-Soomaaliga
Halbeegga Tixda: Xarafraaca (Qaafiyadda )

## WARSIDAHA AGA

### *Ku soo dhowaada tirsiga 3aad ee warsidaha AGA!*

Warsidaha AGA waa warside-xilliyeed ay soo saarto Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaligu (AGA), oo idiin soo gudbiya aqoon isugu jirta xog-wadaag, aqoon-wadaag iyo talo-wadaag.

Warsidahan ujeeddooyinka loo aasaasay waxaa ka mid ah in uu ehelada afka, hal`abuurka, dhaqanka, qoraalka iyo aqoon-faafinta ee daafaha dunida kala jooga la socodsiiyo hawlaha iyo dhaqdhaqaaqyada muhiimka ah ee ku saab-san arrimaha kor ku xusan iyo aqoon-kobcin la xiriirta isla arrimahaas.

Warsiduhu wuxuu ururiyaa, kaydiyaana dhacdooyinka muhiimka ah iyo waxqa-badka arrimaha kore. Wixii ah fikrado iyo talobixin ku saabsan sii hagaajinta, hannaaninta iyo horumarinta warsidahan aad ayaan u soo dhoweynaynaa.

Sidoo kale, gacmo furan ayaan ku soo dhowaynaynaa wararka iyo qoraallada ay soo gudbiyaan qalinleyda iyo ehelada Af-Soomaaligu.

*Warsidahani wuxuu ku soo baxaa nuqul daabacan iyo mid elektoroonig ah.*
*Cinwaanka lagala soo xiriirayaa waa Email: info@aga.so*

### GOOSANKA TIFAFTIRKA

**Tifaftiraha Sare**
Mustafa C.Fayruus
**Agaasimaha**
Axmed M.Dhicisow

**Agaasimaha Farsamada**
Axmed Faarax Saalax

**Kaaliyaha Farsamada**
Amiin Yuusuf Khasaaro

**Bahda tifaftirka**
Cabdullaahi Shiiqaalow
Cabdiraxmaan Abtidoon
Cabdullaahi sh. Cabdi
Saynab Xaaji Axmed

**Kala xiriir : info@aga.so**
**Facebook: @Akadeemiye Goboleedka AfSoomaaliga**
**Twitter:@somaliacademy**
**Website www.aga.so**



# Akadeemiya-Goboleedka AfSoomaaliga oo Shan Jirsatay

Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga (AGA) waxaa u buuxsamay shan sanno laga soo bilaabo maalintii Jabuuti lagu aasaasay oo ahayd 26 Juun 2013.
Waa shan sanno oo Akadeemiye-Goboleedkii hore u ahayd fikradda iyo hiigsiga, fikradii loo tarjumay shaqo joogtaysan iyo hawlgallo mirodhal ah; hiigsigiise weli yahay halkiisii!

Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga aasaaskeedu wuxuu ka dhashay baraarug lagu baraarugay halis weyn oo ku soo fool yeelatay AfSoomaaliga. Halistan xooggeedu wuxuu ka dhashay burburkii Soomaaliya; Soomaaliya oo ahayd waddankii lagu rasmiyeeyey, laguna hirgaliyey qoraalka AfSoomaaliga, ahaydna waddanka keliya ee uu AfSoomaaligu u ahaa afka rasmiga ah ee qaranka - afka loo adeegsado waxbarashada, maamulka, iyo dhinacyada kale ee adeegga bulshada.

Waxaa intaa soo raaca in qiyaastii 1-2 Milyan oo Soomaali qurbajoog ah ay ku kala firdheen daafaha dunida. Ubadka Soomaaliyeed ee qurbaha ku dhashay amaba ku koraya waxaa hubaal ah inuu luminayo afkiisii hooyo haddaan dadaal badbaadineed looga hortagin halistaas muuqata.

Ku darsoo, waxaan maraynaa qarnigii 21aad oo gacanta sare ay leeyihiin aaladaha teknoloojiyadda casriga ah, sida kombiyuutarka iyo internetka. Waxaan la hurayn lagana maarmayn in laga faa`iidaysto adeegyada kala duwan ee aaladahan cusub. Tanina hawl culus oo cilmiyaysan ayay u baahan tahay.
Intaas oo is biirsaday ayaa keenay qayladhaan sannaddo soo socotay, inta badanna ay Jabuuti xarun u ahayd, oo Madaxweyneheeda, Mudane Ismaaciil Cumar Geelle, hiil weyn ka geystay, Naadiga PEN ee qalinleyda Soomaaliyeedna kaalin hormuudnimo ka galay. Gurmadkii qayladhaantaas ayay ka dhalatay Akadeemiya-Goboleedka AfSoomaaligu.

Fikraddii yagleelidda Akadeemiyadan waxay ka mid ahayd talooyin ka soo baxay shirar is dabajoog ah oo sannado kala duwan Naadiga PEN isugu keenay aqoonyahannada afka iyo hal-abuurkiisa; waxayna markii dambe si mug leh uga soo baxday shirweynihii 40guurada qoritaankii Far Soomaalida, FestSOM40, ee lagu qabtay Jabuuti Diisambar 2012. Shirwaynahan waxaa ka soo qaybgalay aqoonyahanno iyo waxgarad badan, oo ay ka mid ahaayeen dhowr xubnood oo ka sii noolaa guddigii AfSoomaaliga ee 1972, kuwaas oo uu horkacayay guddoomiyahoodii, Shariif Saalax Maxamed Cali, ayna weheliyeen Xuseen Sh Axmed Kaddare, Aw Jaamac Cumar Ciise iyo qaar kale, intooda dhimatay Alle ha u wada naxariistee.

Murtidii shirweynuhu waxay ku soo ururtay in la yagleelo hay`ad cilmiyeed ama ‘AKADEEMIYAD’ hormuud u noqota daryeelka AfSoomaaliga iyo suugaantiisa, kana dhexaysa ‘waddamada iyo gobollada’ Geeska Afrika ee Soomaalidu degto.

Lix bilood oo diyaargaraw iyo abaabul ahayd ka dib, waxaa 26/6/2013 Jabuuti lagu saxeexay heshiiskii Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga lagu dhisay, ayna wada saxiixeen madax sare oo ka wakiil ah dawladaha iyo maamullada ka jira geyiga Soomaalida; oo ay ka mid ahaayeen Madaxweynaha Jabuuti, Mudane Ismaaciil Cumar Geelle oo shirka martigeliyey, madaxweynihii Soomaaliya, Madaxweynihii Soomaaliland iyo Madaxweyne-ku-xigeenkii Dawlad-degaanka Soomaalida Itoobiya.

Akadeemiya-Goboleedka AfSoomaaliga (AGA), oo ah xarun-aqooneed loo abuuray daryeelka iyo horumarinta AfSoomaaliga iyo hal-abuurkiisa suugaaneed, waa madal ka dhexaysa dhammaan ummadda Soomaaliyeed. Muddadii shanta sanno ahayd ee ay jirtayna waxay qabatay hawlo badan oo aan halkan lagu soo koobi karin; kuwaas oo ay ka mid yihiin abuuridda iyo hirgelinta ‘*Taxanaha darsidda Afka iyoi Suugaanta Soomaalida*’; diraasado iyo buug-cilmiyeedyo; kulan-aqooneedyo iyo dodo cilmiyeed; Hirgelinta ‘*Madasha AGA ee Horumarinta Afka Hooyo iyo Hal-abuurkiisa;* tababbarro ku aadan xirfadda qalinka iyo qoraalka toolmoon ee AfSoomaaliga; barnaamijka lafaguridda buugga; cilmibaadhista Af-Soomaaliga iyo suugaantiisa; dhiirrigalinta, tababbaridda iyo hagidda da’yarta hibada leh; u ololaynta kobcinta adeegsiga iyo tayaynta afka hooyo; warbaahinta & wacyigelinta; dhisidda iyo hodonaynta degelka AGA ee internetka (www.aga.so) iyo baraha bulshada; iyo qaar kaloo badan.

Hawlahaasi waa kuwo ka duulaya halkudhegga Akadeemiyada oo ah ‘***Hadafkayagu waa hiilka afka hooyo iyo hal-abuurkiisa’***.

Akadeemiya-Goboleedka AfSoomaaligu (AGA) waa madal aqooneed ay si madax bannaan u maamulaan wadar ka kooban aqoonyahanno loo xulay ku xeeldheeridooda AfSoomaaliga iyo suugaantiisa, kuna shaqeeya nafhur iyo mutadawacnimo, si ay ugu hiilliyaan AfSoomaaliga iyo aqoonta ku kaydsan, Af-Soomaaliga oo ah hantida ugu qiimaha badan ee ay leedahay ummad-weynta Soomaaliyeed.



# QORMOOYIN HORTABIN MUDAN

## Waraysi Isuduwaha Laamaha AGA ee Qaaradda Yurub
## Cabdiraxmaan Maxamed Abtidoon

**AGA: Mudane, sida la wada ogyahay bulsho Soomaaliyeed oo aad u badan ayaa ku nool dalalka Yurub. Waxaad nooga warrantaa xaaladda Af-Soomaaligu ku sugan yahay guud ahaan Soomaalida qurbaha ku nool gaar ahaanna Soomaalida reer Yurub?**
**Abtidoon:** Soomaalida qaaradan Yurub ku soo qaxday waxaa saameyn ku yeeshay afafka looga hadlo dalalka ay ku nool yihiin, siiba dhallinyarada iyo carruurta. Balse, waxaa la oran karaa hadda waxaa lagu jiraa xilli la baraarugay, laguna dadaalayo sidii loo soo kaban lahaa. Waxaase xusid mudan, inkasta oo ay jiraan baraaruggaas iyo dadaalkaasi, haddana waxaa jira culaysyo haysta barashada AfSoomaaliga.
**AGA: Maxaa ka mid ah culaysyadaas bulshada Soomaaliyeed ee Yurub, iyo guud ahaanba qurbaha, ka haysta barashada AfSoomaaliga?**
**Abtidoon:** Middani waxay soo martay heerar kala duwan, sannadihii hore waxaa aad u yaraa meelo ay dadku ka helaan tixraac iyo aqoon kororsi dhanka afka hooyo, haddii ay ahaan lahayd goobo lagu barto, buugaag iyo manhaj iwm. Sannadihii dambese dhankaa waa laga soo kabanayay, oo hadda kutub iyo qoraallo online-ba ah way jiraan, welise waxaa liita goobihii waxbarasho.
**AGA: Si gaar ah haddaan u fiirinno ubadka Soomaalida Yurub ku nool, waa sidee xaaladdoodaa barashada AfSoomaaligu? Arrintan ilaa heerkee ayay waalidiintu daneeyaan?**
**Abtidoon:** Carruurta sidoodaba waxaa u fudud afka dalka ay joogaan looga hadlo, maxaa yeelay afkaa ayay dugsiyo ka dhigtaan, saaxiibbada ay waqtiga la qaataanna kula hadlaan, marka ay guryaha joogaanna waxa ay daawadaan telefishinno ku hadla afkaas. Waxaa markaa iska cad in barashada iyo adeegsiga AfSoomaaligoodu iska liidanayo.
Dhanka waalidka, wuu jiraa rabitaan uu waalidku doonayo in carruurtiisu afka hooyo bartaan kuna hadlaan, weliba muddooyinkan dambe dareenka noocaas ahi wuu soo kordhayaa, laakiin waxaa meesha ka maqan dadaalkii loo baahnaa.
**AGA: Maxaa ka mid ah dadaalkaa loo baahnaa ee ay waalidiintu qaban karaan?**
**Abtidoon:** Arrimaha ay aad uga gaabiyaan waalidku waxaa ka mid ah in maaddo AfSoomaali ah dugsiyada carruurtooda loogu daro. Dalalka Yurub intooda badan waxaa loo oggol yahay in carruurta maaddo afkooga hooyo ah loo dhigo haddii waalidiintu ka codsadaan maamulka dugsiga. Fursaddan waalidiinta Soomaliyeed kama faa`iidaystaan.
Waxaan kula dardaarannaa waalidiinta in ay fursaddan ka faa`iidaystaan, oo weydiistaan dugsiyada carruurtoodu dhigato in loo bilaabo maaddo AfSoomaali ah.
**AGA: Dugsiyada ka sokow, maxaa kale ee aad kula talin lahayd si sare loogu qaado in ubadka la baro afkoodii hooyo?**
**Abtidoon:** Waxaan waalidiinta kula talin lahaa in ay carruurtooda kula hadlaan mar walba AfSoomaali, in ay u iibiyaan ama maktabadaha uga soo amaahdaan buugta AfSoomaaliga ku qoran, in suugaanta ay qaban karaan u meeriyaan, maxaa yeelay, suugaanta ay heesuhu ka mid yihiin in dusha laqa qabto way fududahay, waxayna u fududeyneysaa barashada afka.
**AGA: Waxaad warbixin kooban naga siisaa hawlaha Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaligu ka waddo Yurub iyo laamaha ay ku leedahayba?**
**Abtidoon:** AGA waxay laamo ku leedahay UK, Holland, Sweden, Norway iyo Finland. Laamahan oo muddo soo jiray waxaa ka socda hawlo iyo barnaamijyo kala geddisan. Sidoo kale, waxaa dhowaan hawlgelaya laamaha Denmark iyo Talyaaniga, waxaanan rajeyneynaa in dalalka kalena aan gaarsiinno muddada soo socota. Guud ahaan, laamahaasi hawlaha ay qabtaan waxaa ugu weyn wacyigelin, bandhigyo, dood-aqooneedyo iyo tababarro.
**AGA: Intii ay jirtay Akadeemiye-Goboleedka, maxaad isleedahay way ku soo kordhisay danaynta iyo barashada AfSoomaaliga ee Soomaalida Yurub ku nool?**
**Abtidoon:** Inta ay wakiillada iyo laamaha AGA ee Yurub ay shaqaynayeen, waxaan is leeyahay, marka koowaad waxaa kor u kacay dareenka bulshoweynta Soomaaliyeed ee dalalkan ku nool ee ku aaddan afka hooyo; midda labaad waxaa soo kordhaya bandhig buugeedyada iyo buugta ku qoran afka Soomaaliga.
**AGA: Hawshan ah sidii sare loogu qaadi lahaa in ubadka la baro AfSoomaaliga, AGA maxay dadaal ka geysataa?**
**Abtidoon:** Ka AGA ahaan siiba laanta UK waxaan waddnaa barnaamij ah in xarumaha waxbarasho ee ay Soomaalidu maamusho ee gelinka dambe carruurta looga caawino casharradooda [in] sidoo kale lagu baro AfSoomaaliga, meel fiican ayuuna qorshahaas noo marayaa.
**AGA: Ugu dambayn, maxaad kula dardaarmi lahayd bulshoweynta Soomaaliyeed ee qurbaha ku nool, gaar ahaan Yurub, sidii ay ugu hiillin lahaayeen afkooda hooyo?**
**Abtidoon:** Ummad waliba aayaheedu waa ubadkeeda, sidaa darteed, si ubadkeennu u noqdo kuwa han leh, dadnimadooda iyo kalsoonidooduna ay weyn tahay, waa in ay awoodaan in ay si wanaagsan u bartaan afkooga hooyo, kuna hadli karaan AfSoomaali wanaagsan oo tayo leh kaas oo xoojinaya Soomaalinimadooda.
**AGA: Mudane Cabdiraxmaan Maxamed Abtidoon, aad baad u mahadsan tahay!**
**Abtidoon:** Adiga mudan

**Waraysigan waxa Qaaday Saynab Xaaji**

***Waa kuma Abtidoon***
Mudane Cabdiraxmaan Maxamed Abtidoon, waxa uu ka tirsan yahay Xarunta Cilmibaarista Soomaaliyeed ee Jaamacadda 'Roma Tre' ee dalka Talyaaniga, waa bare iyo qoraa buugta barashada afka iyo sheekooyinkaba, Abtidoon waa isuduwaha laamaha AGA ee qaaradda Yurub sidoo kale waxa uu wakiil uga yahay Naadiga Qalinleyda iyo Hal-abuurka Soomaaliyeed (Somali PEN). Waa soo saaraha dokumentari ka hadlaya soo ifbixii horumarkii iyo caqabadaha haysta Afka Soomaaliga.

# Barashada iyo Baridda Af Soomaaliga ee Soomaaliya: Dadaal kala dhiman!

Qore:**Mustafa Fayruus**

Ardayga dhammeeyay dugsiga sare, muddo laba iyo toban sanno ah ayaa loo soo dhigayay maaddada Af-Soomaaliga, haddana afkiisa hooyo kuma qori karo laba sadar oo sax ah oo aan lahayn khalad culus!!

Khaladaad aan la qaadan karin ayaad ku arkaysaa qoraallada ay diyaariyaan xirfadleyaasha ku shaqeeya Af-Soomaaligu.

Qoraalka ka sokow, waa iska caadi inaan aragno qof magac iyo maamuusba leh, aqoonna lagu og yahay, oo marka uu fagaare ka khudbaynayo ay ku adag tahay akhrinta khudbad ku qoran afkiisa hooyo.

Haddaba, qofkan sida buuxda ugu hadla una fahma afkiisa hooyo, waxna bartay ee ka baxay dugsiga sare, maxaa xagaldaacinaya kartidiisa qoraalka iyo akhriska Af-Soomaaliga?

Sannadkii 2014, Akadeemiya-Goboleedka AfSoomaaligu waxay koox xeeldheerayaal Af Soomaaliga ah u xilsaartay inay sahamin ku soo sameeyaan xaaladda adeegsiga Af-Soomaaliga ee dhinacyada tacliinta iyo warbaahinta, ee dalalka Soomaaliya, Jabuuti iyo Itoobiya.

Sahmintan qayb ayaan ka ahaa, hawshayduna ahayd dhanka Soomaaliya, waxay igu baraarujisay jawaabtii su`aasha aan kor ku soo xusnay!

Akhristoow, xusuusnow kama hadlayno luqadda ama afka ay ku baxaan maaddooyinka kala duwan ama 'medium of instruction', ee waxaan ka hadlaynaa maaddada Af-Soomaaliga ee luqad ahaan loogu dhigo ardayga.

Sahamintaasi waxay ka sii maragfurtay, horena aan u ogayn, in Af-Soomaaligu yahay maaddo lagu dhigto heerarka dugsiyada hoose, dhexe iyo sare intaba. Dugsiyada hoose/dhexe, waxaa la dhigaa 2-4 xiisadood, dugsiga sarena 1-2 xiisadood toddobaadkiiba.Tirada guud ee xiisadaha dugsiyada hoose/dhexe waa 30 xiisadood toddobaadkii, dugsiga sarena waa 30-35 xiisadood.

Haddaba, muxuu u liitaa qoraalka iyo akhriska Af-Soomaaliga ee ardaygani? Xaggee ayuu biyodays ka leeyahay dadaalkani?

Cilmibaaristu waxay tilmaantay in biyodays ka jiro dhinacyada manhajka, agabka waxbarashada ee la adeegsanayo, iyo macallinka maaddada dhiga. Qodobbadan aan si kooban isu dul taagno.

**1. Hannaan-abbaarid dheellisan**

Sababta koowaad, uguna darani waa hannaanka loo abbaarayo maadadan oo dheellisan kalana dhantaalan.Waayo, waxaa loo qaatay in maaddada Af-Soomaaliga ujeeddada laga leeyahay ay tahay in ardayga la baro 'suugaan', lana xafidsiiyo gabayo.

Tani waxay ka muuqataa manhajka iyo muqararka maadadan, waxaa kale oo ay ka muuqataa sida loo soo xulo macallinka dhigaya, waxaa kale oo ay ka muuqataa casharrada uu macallinku mudnaanta siiyo.

Muqararka Af-Soomaaliga waxaa ku badan suugaanta, siiba tixda, waxaana ku yar xirfadaha afka iyo adeegsigiisa, sida curinta, habka iyo xeerarka qoraalka iyo xeerarka naxwaha. Dhaliishani waa mid la bilaabatay manhajkii ugu horreeyay ee la diyaariyay bartamihii 1970aadkii.

Waa lagu baraarugay dhaliishan manhajka maaddada ku jirta, waxaana bilowday in wax laga qabto, sida ka muuqata horumarintii lagu sameeyay manhajka maaddadan ee dugsiyada aasaasiga ee UNESCO iyo UNICEF diyaariyeen 2001 iyo 2005, iyo manhajka dugsiga sare ee wasaaradda waxbarashadu diyaarisay 2014. Weli dhaliishan manhajka way ku jirtaa, wax ku filanna lagama qaban, in lagu baraarugayse waa sad.

Waxaa xusid mudan, barashada afka [language] iyo barashada suugaantiisu [literature] waa laba cilmi oo mataano ah kalase duwan, bariddoodudana waxay leedahay habab iyo xirfado kala duwan. Sidoo kale, baahida loo qabo barashadoodu way kala badan tahay.

Ardayga loo dhigayo afkiisii hooyo, waa in laga dhisaa labada xirfadood ee akhriska iyo qoraalka, lana kobciyaa kartidiisa curinta qoraalka toolmoon. Labada xirfadood ee kale, dhegaysiga iyo hadalka, wuxuu ka kasbaday hadal maalmeedkiisa.

Yaan khalad loo fahmin, ujeedkeennu maaha in tix iyo gabayo aan ardayga loo dhigin. Tixdu waa inay saami kooban ku leedahay muqararka, qaybaha kalena waa inay saamigooda leeyihiin; guud ahaanna waa inay ku jaango`an yihiin baahida ardayga iyo sidii loo kobcin lahaa aqoontiisa iyo xirfaddiisa afeed.

Isku soo duuboo manhajku ma buuxinayo baahida ardaygu u qabo in sare loo qaado xirfaddiisa qoraalka iyo akhrinta, macallinkuna aalaaba mudnaanteeda ma siiyo. Sidaas darteed, muddadaa dheer ee ardaygan loo soo dhigayay maaddada Af-Soomaaligu ma dhalin inuu karti buuxda u yeesho akhriska, curinta iyo diyaarinta qoraal toolmoon oo habaysan.

**2. Macallin takhasus iyo xirfadba dhiman**

Sababta labaad waa macallinka Af-Soomaaliga, oo ay caado noqotay inuu maadadan dhigo macallin aan takhasus ahaan iyo xirfad ahaan midna loo soo diyaarinin.

Waa lamahuraan in macallinka, aqoon ahaan iyo xirfad ahaanba, la sii diyaariyo intaanu shaqada bilaabin, intuu shaqaynaya uu helo tababarro kor loogu sii qaadayo xirfaddiisa iyo aqoontiisaba. Labadaas midkoodna ma helo macallinka Af-Soomaaligu.

Ma jiraan hay`ado waxbarasho oo takhasus ahaan soo diyaariya macallinka Af-Soomaaliga shaqada ka hor, ha noqoto dhanka takhasus cilmiyeed ama tababar xirfadeed. Sidaas darteed, Af-Soomaaliga waxaa dhiga macallin aan loo soo diyaarinin.

Macallimiinta sahmintii 2015 aan ku maray, waxaa cilmi ahaan ugu dhowaa maaddadan macallinka ku soo takhasusay Afka Ingiriisiga, iyaguna waxay ahaayeen 10% keliya ee tirada macallimiinta ay sahamintu koobtay. Kuwa kale waxay ku soo takhasuseen fiisigis, xisaab, dhaqaalaha (economics), maamulka ganacsiga (bussiness adminstration) iwm.

Macallinka Af-Soomaaliga waxaa lagu xushaa in uu hiwaayad ama hibo u leeyahay suugaanta Soomaalida, oo uu xiisaynayo. Sidaas darteed, wuxuu ardayda ugu dadaalaa sidii uu kurjad gabayo ah u xafidsiin lahaa, siiba dugsiyada dhexe iyo sare!

# Barashada iyo Baridda Af Soomaaliga ee Soomaaliya: Dadaal kala dhiman!

**3. Agab kala dhiman**

Meesha saddexaad ee biyodayskani ka jiraa waa agabkii waxbarashada ee maaddadani u baahnayd oo kala dhiman.
Buugga muqararka (text book) oo loo wada baahan yahay ka sokow; macallinku wuxuu u baahan yahay buugga tilmaame bare (Teacher`s Guidebook), iyo buugaag kale oo tixraac (reference books); halka ardayguna u baahan yahay buugaag kale oo kaaba (Supplementary reading books), oo uu akhristo, siiba dugsiyada dhexe iyo sare. buugaagta ka sokow, waxaa kale oo loo baahan yahay agab kale oo hawshan loo adeegsan karo.
Buugaag iyo agab kaleba waxa keliya ee laga hayaa waa buugga muqararka, oo isna lagu diyaariyay hannaan-abbaarid dheellisan.
Sidaas darteed, inkasta oo waqti badan iyo kharash badan la geliyo in ardayga loo dhigo maaddada Af-Soomaaliga, haddana waxaa ka soo baxa faa`iido kala dhantaalan oo aad uga hoosaysa dadaalkaa la geliyay!

**Maxaa inala Gudboon?**

Maaddada Af-Soomaaliga ee ardayga loogu dhigo waxbarashadiisa aasaasiga iyo dugsiga sare waa dadaal ammaan iyo bogaadinba mudan; waase dadaal leh goldaloolo wiiqaya, waxaana ka soo baxa faa`iido kala dhantaalan!
Haddaba, sidee wax looga qabtaa goldaloolladaa dadaalka wiiqaya?
Halkan, waxaan ku soo gudbinayaa talooyin kooban, oo kala ah:

**B.Toosinta Manhajka & hannaan-abbaarka maaddada**

Waa in laga bi`iyaa dheelliga iyo kala dhantaalanka haysta maadadan Af-Soomaaliga, lana saxo fikradda laga haysto iyo hannaan-abaarka lagula falgalo. Waana in dib loo qaabeeyaa manhajka maadadan, lana horumariyo muqararka loo dhigayo ardayda, gaar ahaan heerka dugsiyada dhexe iyo sare.

Meelaha ay tahay in mudnaanta la siiyo waxaa ka mid ah in sare loo qaado xirfadda akhriska iyo qoraalcurinta ardayga, iyo suugaanta qaybteeda tiraabta, sida sheekooyinka iwm.

**T.Diyaarinta Macallinka**

In la diyaariyo, lana tayeeyo macallinka Af-Soomaaliga iyo suugaantiisa, loona sameeyo tababar ah aqoonta Af-Soomaaliga iyo xirfadda bariddiisa.

Macallinkani wuxuu u baahan yahay laba cilmi; midi waa AF-SOOMAALIGA IYO SUUGAANTIISA [Somali Language & Literature]. Qof kasta oo Ingiriis ahi ma dhigo Af Ingiriisiga, qof kasta oo Carab ahina ma dhigo Af Carabiga; waxaa dhiga qof soo bartay ‘English Language & Literature’ ama ‘اللغة العربية وآدابها’.Macallinku waa inuu luqadda u bartaa cilmi ahaan… Haa cilmi ahaan!!

Kan labaadna waa xirfadda baridda afka hooyo. In qof luqad la baraa wa xirfad leh hannaan iyo tabo la raaco; weliba baridda afka hooyo iyo baridda luqadda labaad [ajnabiga ah] waxay kala raacaan tabo iyo hannaan kala duwan.
Xilligan waxaa lagu bilaabi karaa tababarro gaagaaban oo la siiyo macallimiinta shaqada ku jira (in-service training). Tababarradani waa inay noqdaan xidhmo tababarro is kaabaya (training packages). Tababarradani waxay, ilaa heer, wax ka tari karaan maqnaanshaha takhasuska Af-Soomaaliga.

Waa in la hiigsadaa muddada dhexe sidii loo hirgelin lahaa macallin leh takhasus iyo xirfad buuxda, heer diblooma ama digrii buuxa. Muddada dibloomada lagu qaadanayo waxay noqon kartaa hal sanno ama laba sanno oo dugsiga sare ka dambaysa (post secondary diploma), ama waxay noqon kartaa digrii buuxa oo heer jaamacadeed ah. Qodobkani wuxuu u baahan yahay darsid iyo lafagurid dheeraad ah.


**J.Kordhinta Agabka Waxbarashada**

In la diyaariyo buugaag kaaba (supplementary reading books) oo barbar socda buugga muqararka, oo ardaydu akhrisato, siiba dugsiyada dhexe iyo sare, waana buugaag sheekooyin iyo aqoon guudba noqon kara. Buugaagtani, waxay xoojinayaan aqoonta iyo xirfadda afeed ee ardaygu u leeyahay afkiisa hooyo.

Sidoo kale, waa in loo hawlgalaa sidii loo haqabtiri lahaa agabka waxbarashada ee maadadani u baahan tahay. Macallinka is xilsaaraa wuxuu diyaarsan karaa agab waxbarasho waxtar leh, waayo, ma yara agabka uu agagaarkiisa si sahlan uga heli karo, wax weyna ku soo kordhin kara hawshiisa.

**Gebagebo.**

Si dadaalka la geliyo baridda Af-Soomaaligu u dhalo faa`iido iyo midho looga qaateen ah, waa in la saxaa dhaliilaha jira, waxaana taa lagu gaari karaa talooyinka kor ku xusan.
Hawsha horumarinta maadada Af-Soomaaliga iyo fulinta talooyinka kor ku xusan waxaa looga fadhiyaa Wasaaradda Waxbarashada, hay`adaha ka shaqeeya tacliinta, iyo hay`adaha ka shaqeeya Af Soomaliga. Mid kastaa waa in uu kaalinta kaga aadan gutaa, iyadoo dadaalladoodu ay noqonayaan kuwo is kaabaya isna dhammaystiraya.



# WARARKA WAXQABADKA AGA

## 'Haldoor' buugga labaad ee 'Taxanaha Darsidda Afka iyo Suugaanta Soomaalida' oo soo baxay

*"Shariif Saalax waxa uu ahaa aqoonyahan, cilmibaare, diblomaasi, siyaasi iyo xirfadle maamul. Waxana uu soo qabtay shaqooyin iyo xilal kala duwan, laga soo bilaabo bilowgii 1950aadkii"*

Waxaa soo baxay buugga 'Haldoor: Taariikh-nololeedkii iyo Dhaxal-cilmiyeedkii Shariif Saalax Maxamed Cali (1936 – 2014)' [ISBN: 978-0-9686867-3-7]. Buuggani waa buuggii labaad ee Taxanaha Darsidda Afka iyo Suugaanta Soomaalida, oo ay soo saarto Akadeemiya-Goboleedka AfSoomaaliga; waxaana wada qoray Mustafa Cabdullaahi Fayruus iyo Cabdulqaadir Nuur Xuseen "Maax".
Sida magaciisaba ku cad, buuggani waa dhigane diiwaangelinaya dadaalkii weynaa ee uu muddo kon-ton sanno ka badan ku soo jiray Shariif Saalax Max-amed Cali, isla markaana bildhaaminaya dhaxal-cilmiyeedkii uu innooga tegay.
Shariif Saalax waxa uu ahaa aqoonyahan, cilmibaare, diblomaasi, siyaasi iyo xirfadle maamul. Waxana uu soo qabtay shaqooyin iyo xilal kala duwan, laga soo bilaabo 1950aadkii. 'Buuggan laguma soo wada koo-bin taariikhnololeedkii iyo waxqabadkii ballaarnaa ee Shariif Saalax, waase inta la karay waqtiguna saamaxay.' ayay qoreyaashu gogoldhigga buugga ku yiraahdeen.
Daahfurka buuggani wuxuu qayb ka ahaa xaflad bal-laaran oo lagu maamuusayay Maalinta Caalamiga ah ee Buugga, ay soo qabanqaabisay Akadeemiya-Goboleedka AfSoomaaligu, kana dhacday Muqdisho 23/4/2018.
Buuggan 'Haldoor' waa 210 bog, wuxuuna ka kooban yahay saddex qaybood. Qaybta koowaad waa lix cutub, oo kala ah: (1) Dhalashadii iyo bilowgii noloshiisa, (2) Waxbarashadiisii. (3) Sooyaalkii shaqooyinka iyo xilalka, (4) Dadaalkiisii cilmibaarista iyo qoraalka, (5) Aragtida iyo fikradaha Shariif Saalax ee la Xiriira Af-Soomaaliga iyo Cilmibaarista, iyo (6) Geeri culus iyo baroordiiq. Qaybta labaad waa li-faaqyo ah 'qoraallo iyo khudbooyin la xiriira Af-Soomaaliga iyo Cilmibaarista' oo laga helay kaydka Shariif Saalax, ahna qoraallo muhiim ah oo uu u di-yaariyay munaasabado kala duwan. Qaybta sad-dexaad waa sawirro xul ah oo muujinaya taariikh-nololeedkii marxuumka.
Buuggan, oo ay daabacday Akadeemiya-Goboleedka AfSoomaaligu, mar waa xus iyo baro-ordiiq; marna waa abaalgud iyo bogaadin; marna waa iftiiminta jiilka dambe la tusayo, si ay ugu day-daan, sooyaalkii shaqo ee marxuumka, oo wada ahaa dadaal iyo xilkasnimo.
Diyaarinta buuggan waxaa waqti badan iyo dadaalka badan u huray labada qore ee kala ah: Guddoomiye Cabdulqaadir Nuur Xuseen "Maax", oo fikradda buugga curiyay, u hawlgalkiisana bilaa-bay, iyo Bare Sare Mustafa Cabdullaahi Fayruus oo hareeraha la qabtay, dadaal badanna geliyay ururinta xogta cilmiyeed iyo dhisidda nuxurka buuggu xambaarsan yahay.
Haldoor waa buuggii labaad ee taxanaha la magac baxay *'Taxanaha Darsidda Afka iyo Suugaanta Soomaalida'*. Buuggii koowaad ee taxanahani wuxuu ahaa *'Afmaal: Proceedings of the Con-ference on the 40th Anniversary of Somali Orthography'* oo la daabacay sannadkii 2015.
Buugga koowaad waxaa lagu ururiyay qoraalladii cilmiyeed ee lagu soo bandhigay Shirweynihii Afar-tanguurada Qoritaanka FarSoomaalida, ee bishii Diisambar 2012 lagu qabtay Jabuuti.
*'Taxanaha Darsidda Afka iyo Suugaanta Soomaalida' waa silsilad dhiganeyaal ah oo ay diyaariso* Akadeemiya-Goboleedka AfSoomaaligu. Taxanahan waxaa looga golleeyahay dhiirrigelinta, taageeridda iyo horumarinta dadaalka cilmiyeed ee ku wajahan ururinta, darsidda, kaydinta, fidinta iyo horumarinta Af-Soomaaliga iyo hal-abuurkiisa fan iyo suugaaneed. Hiigsiga Akadeemiya-Goboleedka AfSoomaaligu waa in sannadkiiba uu soo baxo dhigane ku aroora taxanahani.

***Warsidaha AGA***

### Guddoomiyaha AGA oo u tagay Jabuuti iyo Yurub Dardargalinta Hawlaha Akadeemiye-Goboleedka

**"Waxaa loo baahan yahay dibuhabaynta iyo dardargelinta hawlaha AGA ee Yurub"**

Guddoomiyaha Akadeemiye-Goboleedka Af-Soomaaliga, Dr Maxamed Daahir Afrax, wuxuu Bishii Juun 2018 booqasho hawleed ku kala bixiyay dalalka Jabuuti iyo Ingiriiska.
Muddadii uu joogay Jabuuti waxa uu kulanno kala duwan la yeeshay xubnaha Akadeemiye-Goboleedka ee reer Jabuuti iyo madax ay qusayso arrinta Akadeemiye-Goboleedku.
Waxa uu kala hadlay sidii loo dardargalin lahaa, loonna xoojin lahaa laanta AGA ee Jabuut. Waxa kale oo uu la kulmay Madaxweynaha Jamhuuriyadda Jabuuti, Md Ismaaciil Cumar Geelle iyo Wasiirka Diinta iyo Dhaqanka, Md Muumin Xasan Barre; wuxuuna uga warramay halka ay marayaan guud haan hawlaha aka-deemiyada gaar ahaanna arrinta dhismaha xa-runta AGA ee Muqdisho.
Dhammaan kulannadaas waxaa ka soo baxay natiijooyin mirodhal ah.
Guddoomiyuhu waxa uu Jabuuti uga sii gudbay Dalka Ingiriiska (UK), halkaas oo uu is waraysi iyo wadatashi kula yeeshay bahda AGA UK iyo wakiilladaYurub. Waxay iska xog-waraysteen heerarka ay marayaan guud ahaan hawlaha AGA, gaar ahaanna kuwa xarunta iyo kuwa Yurub; waxaa la isla falanqeeyay caqabadaha jira iyo qorsheyaasha mustaqbalka. Waxaa la isla meel dhigay arrimo badan, waxaana ka mid ahaa: Dib u habaynta iyo xoojinta laamaha Aka-deemiye-Goboleedka ee Yurub iyo UK; Qaba-shada shir ka dhaca UK bisha sagaalaad/ Sabtembar ee sannadkan, ujeedkiisuna yahay dib u habaynta Laanta UK iyo dardargalinta hawleheeda; Booqasho xubna ka socdo Aka-deemiyada ku booqdaan laamaha Yurub.
Dhanka kale, Guddoomiyuhu muddadii koob-nayd ee uu halkaas joogay wuxuu waraysiyo kala duwan kuna saabsan AfSoomaaliga iyo Akadeemiye-Goboleedka siiyey warbaahinta caalamiga ah ee AfSoomaaliga ku hadasha, sida VOA Somali; waraysigaas oo dad badan soo jiitay.

# Xuska Maalinta Caalamiga ah ee Buugga Iyo Daahfurka Buugga Haldoor




Xaflad isugu jirta "Xuska Maalinta Caalamiga ah ee Buugga" iyo "daahfurka buugga 'Haldoor: taariikh-nololeedkii iyo dhaxal-cilmiyeedkii Shariif Saalax Maxamed Cali (1936-2014)" ayaa lagu qabtay Magaalada Muqdisho 23/4/2018.

Xafladdan, oo qayb ka ahayd xuska 'Maalinta Caalamiga ah ee Buugga iyo Xuquuqda Hal`abuurka' oo ku beegan 23 Abriil, waxaa soo qabanqaabiyay Akadeemiye-Goboleedka Af-Soomaaliga, oo kaashanaysa Akadeemiyada Cilmiga, Fanka iyo Suugaanta, waxaana ka soo qaybgalay aqoonyahanno, waxgarad iyo masuuliin kala duwan.

Guddoomiyaha Akadeemiye-Goboleedka Af-Soomaaliga, Dr. Maxamed Daahir Afrax ayaa furitaankii xafladdan ka sheegay in ay isugu jirto laba munaasabadood oo waaweyn, "Shariif Saalax wuxuu ahaa halyey u taagan hiilka afka hooyo, aqoon faafinta iyo horumarinta dhaqanka, sidaas darteed, ayaan gardaadinta buuggiisan 'Haldoor' ugu begnay Maalinta Caalamiga ah ee Buugga" ayuu yiri Dr Afrax, waxaana uu ku daray "Akadeemiya-Goboleedku waxa ay iska xilsaartay maamuusidda iyo xuska maskaxmaalka Soomaaliyeed, oo ummadda ugu fadhiya qiime weyn."

Guddoomiyaha Aqalka Sare ee Baarlammaanka Soomaaliya Senatar Cabdi Xaashi Cabdillaahi oo si rasmi ah u furay munaasabadda ayaa si kooban uga hadlay taariikhdii Shariif Saalax, waxaana uu tibaaxay in uu ahaa waddani aan la illoobi doonin, ayna lagama maarmaan tahay in taariikhdiisii loo gudbiyo jiilalka soo koraya, si ay ugu daydaan.

Waxaa kale oo goobta ka hadlay Xildhibaan Shariif Maxamed C/llaahi Xuseen iyo Marwo Caasha Cabdi Diini oo ku hadlayay magaca ehelada Shariifka, oo iyana ka sheekeeyay dhinacyo noloshiisa ka mid ah. Dhanka kale waxay u mahadceliyeen Akadeemiya-Goboleedka AfSoomaaliga oo iska oo dadaal weyn geliyey soo saarista buugga 'Haldoor'.

Masuuliinta iyo aqoonyahanka goobta ka hadlay waxaa ka mid ahaa Guddoomiyaha Guddiga Warbaahinta ee Golaha Baarlamaanka Xildhibaan Khaalid Macow C/qaadir, Xildhibaan Maryan Cariif Qaasim, Guddoomiyaha Akadeemiyada Cilmiga, Fanka iyo Suugaanta C/qaadir Nuur Xuseen (Maax) oo ka mid ahaa qorayaasha buugga Haldoor, Mustafa C/laahi Fayruus oo ka tirsan xeeldheerayaasha AGA kana mid ah qorayaasha buugga, Md C/laahi Maxamed Shirwac oo ka tirsan ururrada bulshada rayidka iyo Kusimaha guddoomiyaha Golaha Abwaannada Abwaan Xirsi-Dhuux Maxamed.

Intuba waxay wax ka tilmaameen taariikh-nololeedkii iyo waxqabadkii Shariif Saalax, waxayna bogaadiyeen soo saaridda buugga 'Haldoor'. Buuggan 'Haldoor: taariikh-nololeedkii iyo dhaxal-cilmiyeedkii Shariif Saalax Maxamed Cali (1936-2014)' waa buuggii labaad ee '*Taxanaha Darsidda Afka iyo Suugaanta Soomaalida'* ee ay soo saarto Akademiye-Goboleedka AfSoomaaligu.

***"Akadeemiya-Goboleedku waxa ay iska xilsaartay maamuusidda iyo xuska maskaxmaalka Soomaaliyeed, oo ummadda ugu fadhiya qiime weyn."***

## Dufcaddii Saddexaad ee Tababarka Habaynta Qoraalka oo Muqdisho loogu Qabtay

Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga ayaa dhallinyaro u qabatay tababar ku saabsan 'habaynta qoraalka Af-Soomaaliga' 9/7/2018.

Tababarkan waxaa ka faa`iidaystay dhallinyaro ka tirsan naadiyada akhriska iyo qoraalka ee Muqdisho, una badnaa xarunta Ifiye.

Tababarkani waa kii saddexaad oo noociisa ah, kuna saabsan 'habaynta qoraalka Af-Soomaaliga' oo loo qabto dhallinyarada akhriska iyo qoraalka.

Guddoomiyaha Akadeemiye-Goboleedka Af-Soomalaiga Dr Maxamed Daahir Afrax oo khudbad ka soo jeediyay furitaankii tababarkaasi ayaa sheegay inuu tababarkani ka mid yahay tababarro taxane ah oo ay Akadeemiyada ugu talagashay turxaanbixinta qorista Af Soomaaliga.

"Qoraalka Afka Soomaaligu tayayn badan ayuu u baahan yahay, higaada qoraalka ayaa inta badan la qaldaa, nasiib-darro waxaa la fuddudeystaa Shibanayaasha labba-laabma, Shaqalada dhaa-dheer iyo astaamaha uu qoraalku leeyahay, cawaaqib xumo ayaa ka dhalan karta haddii aan xil gaar ah la iska saarin ereyga qoran ee afka hooyo" ayuu yiri Dr Afrax oo hoosta ka xariiqay in qofku hadba sida uu u hagaajiyo qoraalkiisu ay saamayn ku leedahay sumcaddiisa.

Madaxa Xarunta Ifiye Mudane Sakariye Cali Gurey oo isna halkaas ka hadlay, ayaa sheegay in wax badan laga faa'iidaysan doono tababarkaas, isagoo dhinaca kale u mahadceliyay Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga oo soo agaasintay tababarkan.

Casharada tababarkan waxaa bixinayay macalimiiin ka tirsan Akadeemiye-Goboleedka Af-Soomaaliga, oo kala ahaa Bare Sare Mustafa Fayruus iyo mudane Cabdulaahi (Gacanka).

Xiritaankii tababarkaas waxaa ka hadlay kusimaha Guddoomiayaha Golaha Abwaannada Soomaaliyeed Abwaan Xirsi-dhuux Maxamed oo booriyay in la joogteeyo tababarrada noocan oo kale ah, isagoo u mahadceliyay Akadeemiye -Goboleedka AfSoomaaliga, kuna ammaanay dadaalka joogtada ah ee ay ugu jirto u hiillinta afka hooyo.



**"Xilligan qoraalka Af-Soomaaligu wuxuu u baahan yahay tayayn badan"**

# WARAR KALE OO XUSID MUDAN

## Bandhigyada Buugaagta Sannadlaha ee Kismaayo, Garoowe iyo Hargeysa

Saddexdii bilood ee u dambeeyay waxaa qabsoomay saddex bandhig buugeed, oo ka kala dhacay magaalooyinka Kismaayo, Garoowe iyo Hargeysa.

**Kismaayo:** Bandhiggii 2aad ee Buugaagta Kismaayo ayaa 23-25/4/2018 lagu qabtay magaalada Kismaayo, Jubbaland. Bandhiggani waa sannadle la bilaabay 2017.

**Garoowe:** Bandhigga Caalamiga ah ee Buugaagta Garoowe ayaa lagu qabtay Garoowe, Puntland. Bandhiggan oo ah sannadkii 4aad wuxuu qabsoomay muddadii u dhexaysay 16-19/7/2018, waxaana ka soo qaybgalay aqoonyahanno iyo qoraayo caan ka ah geyiga Soomaaliyeed.




**Hargeysa:** Bandhigga Buuggaagta Hargeysa ayaa isna ku qabsoomay Hargeysa, Somaliland, muddadii u dhexaysay 21-26/7/2018. Bandhiggan oo ah kii 11aad waa sannadle waxaana la bilaabay 2008, muddadaasna si joogto ah ayuu u qabsoomayay.

Bandhigyadan buugaagta ee lagu kala qabtay dhowrkaas magaalo waxaa lagu soo bandhigay buugaag kala duwan oo dhowaan la qoray, kana kala hadlaya arrimo kala duwan.

Fikradaan bandhigga buugaagta waxaa geyiga Soomaaliyeed ka bilaabay Naadiga qalinleyda iyo hal'abuurka Soomaaliyeed (Somali pen), oo uu guddoomiye ka ahaa Dr Maxamed Daahir Afrax, oo bandhiggii ugu horreeyay ku qabtay Jabuuti sannadkii 2006.

Bandhigyada buugaagtu waxay kaalin weyn ka qaataan isbarashada iyo isdhexgalka bulshada, sidoo kale wuxuu kor u qaadaa fiditaanka buugga, soo bandhigidda hibooyinka, kordhinta akhriska iyo kobcinta garaadka iyo kasmada dadweynaha.



## Maalinta Buugga iyo Xuquuqda Hal-abuurka oo lagu Xusay Jabuuti

Xaflad lagu maamuusayay 'Maalinta Caalamiga ah ee Buugga iyo Xuquuqda Hal`abuurka' ayaa lagu qabtay magaalada Jabuuti.

Waxaa xafladdan soo agaasimay Wasaaradda Dhaqanka Jabuuti, waxaana ka soo qaybgalay Madaxweynaha Jamhuuriyadda Jabuuti Mudane Ismaaciil Cumar Geelle, Guddoomiyaha Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga Dr. Maxamed Daahir Afrax, Wasiirka Diinta iyo Dhaqanka Jabuuti mudane Muumin Xasan Barre, iyo masuuliin kale.

Guddoomiyaha Akadeemiye-Goboleedka Af-Soomaaliga Dr. Maxamed Daahir Afrax, oo goobta ka hadlay ayaa hoosta ka xarriiqay qiimaha uu buuggu ugu fadhiyo kobcinta aqoonta bulshada iyo horumarka nolosha.

Gebagebadii waxaa goobta ka hadlay Madaxweynaha Jamhuuriyadda Jabuuti Mudane Ismaaciil Cumar Geelle oo ku nuuxnuuxsaday qiimaha ay leedahay ilaalinta xuquuqda hal`abuurku iyo sida loogu baahan yahay.



### 'Waa in la ilaaliyaa Xuquuqda Qoraaga iyo Hal`abuurka'

## Magaalada Berbera oo laga furay maktabadda

Maktabad guud oo loogu talogalay inay ka faa`iidaystaan ardayda dugsiyada, jaamacadaha iyo guud ahaanba dadweynaha ayaa 22/4/2018 laga furay Berbera. Dhismaha maktabadda waxa inta ugu badan maalgalisay Dawladda Hoose ee Berbera; waxaa kale oo gacan ka gaystay shirkado ganacsi iyo dadweyne.

Tallaabadani waxay mudan tahay bogaadin, ammaan iyo kudayasho .

# KORORSO AQOONTAADA

## Wadaraynta Magacyada Af-Soomaaliga Qormada 2aad

Waxaan qormadii hore ee 'wadaraynta magacyada Af-Soomaaliga' ku soo sheegnay inay jiraan siddeed nooc oo magacyadu dheddig iyo lab isugu beddelaan; waxaan ka soo hadalnay nooca 1aad.
Qormadan labaad waxaan kaga hadlaynaa nooca 2aad iyo nooca 3aad, oo ka mid ah siddeedda nooc ee magacyadu dheddig iyo lab isugu beddelaan.

**Nooca 2aad:**

Xeerarka nawxaha oo la raacayo, waxaa ka mid ah:
1. Magaca kelida ahi waa in uu magac dheddig ahaadaa.
2. Waa in uu marka uu wadar noqdo isu beddelaa magac lab ah.
3. Waa in magacyda dheddig oo kelida ahi ay ku dhammaadaan xarafka (o).
4. Magacyada wadarta ahina waa in ay gadaal ka raacaan xarfaha (-oyin).

U fiirso tusaalooyinka ku xusan shaxda hoose:

***Shaxda nooca 2aad***

| ***Magac dheddig, keli ah*** | ***Magac wadar, lab*** |
|---|---|
| ayeeyo (-da) | Ayeeyooyin (-ka) |
| buulo (-da) | Buulooyin (-ka) |
| dhalo (-da) | Dhalooyin (-ka) |
| dhawrto (-da) | Dhawrtooyin (-ka) |
| eeddo (-da) | Eeddooyin (-ka) |
| hooto (-da) | Hootooyin (-ka) |
| hooyo (-da) | Hooyooyin (-ka) |
| maanso (-da) | Maansooyin (-ka) |
| magaalo (-da) | Magaalooyin (-ka) |
| maro (-da) | Marooyin (-ka) |
| qaanso (-da) | Qaansooyin (-ka) |
| qubo (-da) | Qubooyin (-ka) |
| talo (-da) | Talooyin (-ka) |
| tuulo (-da) | Tuulooyin (-ka) |
| waddo (-da) | Waddooyin (-ka) |
| xero (-da) | Xerooyin (-ka) |

**Nooca 3aad**

Nooca 3aad wuu ka duwan yahay labadii nooc oo aan horay u soo marnay.
Akhriste, sidaad xusuusato, noocyadii 1 iyo 2, magaca kelida ahi mar kasta, wuxuu ahaa dheddig, marka uu wadar noqdana wuxuu isu beddelayey lab.

*Xeerarka naxwaha ee la raacayo, waxaa ka mid ah:*
1. Magaca kelida oo labka ahi, marka uu wadaroobo u beddel dheddig.
2. Magacyadu hal alanle waa ay ka badan yihiin.
3. Si wadar looga dhigo magacyada, waxaa gadaal ka raacaya xarafka (o) ama (yo).
4. Magacyada qaarkood waxaa labanlaabmaya shibbanaha ugu dambeeya.
5. Xarafka (o) oo magacyada dheddig oo wadarta ah gadaal laga raaciyo, wuxuu isu beddelaa (a) marka qodobka dheddig magaca gadaal laga raaciyo.

U fiirso tusaalooyinka ku xusan shaxda hoose:

*Shaxda nooca 3aad*

| *Magac keli lab* | *Magac Wadar dheddig* |
|---|---|
| Baabuur (-ka) | Baabuurro (-da) |
| Dariiq (-a) | Dariiqyo (-da) |
| Dhinac (-a) | Dhinacyo (-da) |
| Nacas (-ka) | Nacasyo (-da) |
| Sannad (-ka) | Sannaddo (-da) |
| Waddan (-ka) | Waddammo (-da) |
| Sambab (-ka) | Sambabbo (-da) |
| Markhaati (-ga) | Markhaatiyo (-da) |
| Suldaan (-ka) | Suldaammo (-da) |
| Dhurwaa (-ga) | Dhurwaayo (-da) |
| Libaax (-a) | Libaaxyo (-da) |
| Maroodi (-ga) | Maroodiyo (-da) |
| Aroos (-ka) | Aroosyo (-da) |
| Laami (-ga) | Laamiyo (-da) |
| Garays (-ka) | Garaysyo (-da) |
| Digsi (-ga) | Digsiyo (-da) |
| Yaxaas (-ka) | Yaxaasyo (-da) |
| Dhagax (-a) | Dhagaxyo (-da) |
| Babis (-ka) | Babisyo (-da) |
| Fandhaal (-ka) | Fandhaallo (-da) |
| Saxan (-ka) | Saxammo (-da) |
| Derbi (-ga) | Derbiyo (-da) |
| Qaamuus (-ka) | Qaamuusyo (-da) |
| Erey (-ga) | Ereyo (-da) |
| Magac (-a) | Magacyo (-da) |
| Guddi (-ga) | Guddiyo (-da) |
| Dhawaaq (-a) | Dhawaaqyo (-da) |
| Baaldi (-ga) | Baaldiyo (-da) |
| Gambar (-ka) | Gambarro (-da) |
| Nabaddoon (-ka) | Nabaddoonno (-da) |
| Lifaaq (-a) | Lifaaqyo (-da) |
| Layli (-ga) | Layliyo (-da) |
| Doofaar (-ka) | Doofaarro (-da) |
| Ubax (-a) | Ubaxyo (-da) |

Sida aan tilmaannay, xarafka (o) oo magacyada dheddig oo wadarta ah gadaal laga raaciyo, wuxuu isu beddelaa (a) marka qodobka dheddig magaca gadaal laga raaciyo; tusaale: baabuurro (baabuurrada),

***W. D. Cabdullaahi Maxamed Sheegow***

# Halbeegga Tixda: Xarafraaca (Qaafiyadda )Qormada 1aad




Marka loo fiirsado hab-sameysanka tixda, waxaa jira dhowr qodob oo xeer dhigadka u ah, oo ay ku maansowdo. Waa qodobbo aan looga maarmeyn dhismaha falkada meeriseynta tixda. Waa qodobbo in lagu saleeyo mooyee aaney la'aantooda si kale ku tixoobeyn. Qodobbadani waxay kala yihiin:

Xarafraac ereyeed oo lagu dhiso

Miisaan sargooya in ay lahaato

Tix marka la qiimaynayo halbeeggeeda maanseed waxaa looga qiyaas qaataa qodobbadaas. Hawraar weliba oo tixeed marka aan qiimeyneyno waxaan ka eegeynaa qodobbadaa gundhiga u ah in ay ku soohan tahay iyo in kale. Haddii laga wada helo waa sidii la rabey oo muran kama joogo tixoobiddeeda, maadaama ay buuxisey dhammaan shuruudihii looga baahnaa halbeegga maansoobideeda.

Haddii laga waayo qoddobada ay tixdu ku sameysanto markaa hawraartaa kuma sheegi karno in ay tix.

Haddiise laga helo qoddobada qaarkood, qaarna ay ka marnaato, oo uu kala dhantaalan ku jiro, marka waxay noqonaysaa **'tix jaban'** oo aan gaarsiisnayn heerkii laga rabay ee ay ku tixoobi lahayd.

Ugu horrayn Tixda halbeeggeeda maanseed waxaa laga eegaa xarafraac ereyeed in ay ku saleysan tahay iyo in kale.

**XARAFRAACA TIXDA:**

Sidaan soo xusnay halbeegga Tixda qoddobada xeerdhigadka u ah sameysankeeda waxaa ka mid ah xarafraaca ereyeed ama qaafiyadda.

Guud ahaan tixdu waxay ka abuuranto xuruufta Alif ba'da AfSoomaaliga.

Waana '22' xarafraac, oo kala ah '21' Shibbane iyo tobanka Shaqal oo isu geyntooda hal xarafraac ereyeed isku ah, loona yaqaan 'Alifley' ama 'Hamsa'.

waxay kala yihiin kuwa soo socda:

**Shibbaneyaasha kala ah:** { B T J X D R S SH DH C G F Q K L M N W H Y}.

**Shaqallada kala ah:** {A E I O U} { AA EE II OO UU} oo isku ah hal xaraf raac oo 'Alifley' ama 'hamsa' loo yaqaan.

Tix waliba oo maanseed waxay ku soohan tahay 22 xaraf midkood oo ay ku tixeysan tahay falkada meeriseynteedu.

Bal aad ugu fiirsada tusaalooyinka tixooyinka soo socda.

**Tusaalaha 1aad:** Xarafraaca xarafka 'Ba'

**Bowdada** markii aan ka jabey, **boqonka** taaggiisa.
Habeenkiiba way **bidhan** lahaa, **bahalki** cowlaaye.
Raggii **buurta** dheer igala **baxay, beerka** ka ogsooni!
**Bah** Cillaamo goortay aniga, iga dul **booyaysay.**
**Bah** Sadheys inay **baga** tidhi **beerka** ka ogsooni.

Xaaji Gabay Xaddi....

Shantan tuduc ee aan ka soo qaatay gabaygii uu mariyey Xaaji Gabay Xaddi, markaad u fiirsato waxaad ogaanaysaa in ay yihiin ereyo ka bilowda Shibbanaha xarafka 'B'.

Ereyada uu xaraf kacoodu 'B' yahay ee ku jira tuduc walba, haddaan gaar u soo sooco waxay kala yihiin:

M1 = **bowdada, boqonka;**
**M2= bidhan, bahalki;**
**M3= buurta, baxay, beerka;**
**M4 = bah, booyeysey;**
**M5 = baga, beerka.**

Haddaba waxaa halkaa innoogu caddaaday oo aan mugdi innooga jirin xarafraaca shanta tuduc ee kor ku xusan inay tixayntoodu ku meersan tahay xarafka 'B'.

**Tusaalaha 2aad:** Xarafraaca xarafka ''T''

**Toddobaatan** iyo **toban** miyaan, **tiriyey** waageyga
Sidii wiil **tarrada** ceel marshoo, **timaha** deebeeyey
**Tin** madow miyaa laga dayey aniga **tuurkeyga**?.
Ma **tallaabadaan** la cabsadoo, **iigsi** lugo moodey?
Ma **tukubey** sida habar **tu** kale, **tuugmo** ugu jeeda?
**Taf** madow haddaan qaadan jirey maro, **tilmaan** dheer leh.
**Tar-tarrada** ma libir baan ku xirey **taako** iyo labadeeda?

Aadan Gurey Cabdulle Xasan

Meerisyadan marka aan u dhabbagalno, waxaan ogaaneynaa in ay ku tixaysan yihiin xarafka ''T''; erayada xarafraacana waxaan ku qornay midab aad u madow [bold].

**Tusaalaha 3aad:** Xarafraaca xarafka ''J''

Adaa Koofilow **jiitay** aan, dunida **joogayne.**
Adigaa **jidkii** lagugu wacay, **jimic** la'aaneede.
**Jahannama** la geeyow haddaad, Aakhirow **jahatey**
Nimankii **Jannow** kacay war bay, **jirin** inshaalleeye-
**Jameecooyinkii** iyo haddaad, **jowhartii** aragto.

Sayid Maxamed Cabdulle Xasan.

.

Meerisyadan kore waxay ku socdaan xarafka 'J', erayada xarafraacana waxaan ku qornay midab aad u madow.

Waa innoo qormada 2aad oo aan ku sii falanqayno halbeegga xarafraaca oo ka mid ah halbeegyada tixda Af-Soomaaligu ku dhisanto.

**WD Cabdulaahi Cabdi Aadan (Gacanka )**
**E-Mail: gacankalfle@gmail.com**

# MURTIDA WARSIDAHA

## Ka Fiirsadka Guurka

Soomaalidu waxay tiraahdaa saddex guuldaraa u dambaysa:-

- Guur aan ka fiirsi lahayn.
- Geeddi aan sahan lahayn.

Iyo guddoon aan la tashi lahayn.

Culimada ku xeeldheer cilmiga bulshadu waxay ti-baaxeen isbarashadu inay soo marto saddex marx-aladood oo kala ah:

1. Marxaladda lagu magacaabo marxaladda xiisaha.
2. Marxaladda baraarugga, iyo

Marxalada isbarbardhigga.

Saddexdan ka baar qofka aad guursanaysid:-

1. Waxii qabta ma qaadan karaa?
2. Waxii loo qabta ma qaddarin karaa?

Iyo Waxuu qabo ma qarsan karaa?

Qodobka koowaad oo ah ‘waxii qabta ma qaadan karaa’, wuxuu koobayaa degganaansho, samirka, dulqaadka, iyo wixii noocaas ah oo dhan.

Qodabka labaad oo ah waxii loo qabta ma qaddarin karaa, wuxuu koobayaa isbarbardhigga, inuu yahay shaqsi wax badan kala fahmi kara, ogna waxa loo qab-tay. Waana tii horay loo yiri “qof waxaa ugu xun qof og waxa ka maqan, laakiin aan ogayn waxa ku maqan” mar kasta ogow waxa laguu qabtay.

Qodobka saddexaad waxaa laga doonayaa xaalad walba oo soo wajahda inuu qarsan karo, uuna leeyahay awood ama dulqaad aad u sarreeya kuna filan. Mar kasta waa inuu ku qancaa xaaladaha soo wajihi kara, dhib ama dheef; uuna ahaado shaqsi dhawrsan

**Murti ‘afar’ shub ah:**

Afar ha ku adkaan:

- Aabbahaa.
- Hooyadaa.
- Walaalkaa.
- Walaashaa.

Afar Ilaahay ka magangal:-

- Hammiga.
- Murugada.
- Caajiska.
- Iyo bakhaylnimada.

Afar u nuglow:-

- Agoonta.
- Masaakiinta.
- Faqiirka.
- Iyo Dadka xanuunsanaya

Afar isku qurxi:-

- Sabarka.
- Dulqaadka.
- Cilmiga.
- Iyo Sharafta.

Afar u dhowoow:-

- Qofka mukhliska ah.
- Qofka abaalka leh.
- Qofka dabciga wanaagsan.
- Iyo qofka runlowga ah.

Afar ha la saaxiibin:-

- Beenaalaha.
- Tuugga.
- Xasadka.
- Iyo qofka faanka badan.

Afar iska yaree:-

- Cuntada.
- Hurdada.
- Caajiska.
- Hadalka.

Afar ha ka go'in:-

- Salaadda.
- Qur'aanka.
- Xuska Rabbigaa
- Iyo Qaraabada.

**Belaayo looma yeerto!**

Nin baa waxaa laga hayaa beri hore inuu yiri ‘balaayo ayaan ka wardoonayaa’!

Maalintii dambe ayuu ubbo biyaystay, ri'na kaxaystay, dhul lamadegaan ahna safar dheer ka bilaabay. Markii uu in muddo ah sii socday ayuu aad u harraaday, ri'diina way u socon wayday, wax uu sameeyana wuu garan waayay. Markii ay talo ku caddaatay, meeshuna ay cidla ciirsila` tahay, ayuu intuu ri'dii biyihii waraabiyay, haddana bireeyay haraggiina ka bixiyay. Deedna inta madag shitay ayuu hilbaheedii solay markaana cunay!!

Qof harraad la socon la', oo hilib solon cunay, xaalkiisu sidii uu noqon lahaa ayuu noqday!! Ogoow, Soomaali hore ayay u tiri ‘***belaayo looma yeerto’***.

**Maahmaah**


- Baadiyi nin aan lahayn bay ag joogtaa.
- Banaankiis mare maradiisa geed ma qabsado.
- Biyo sacabbadaadaa looga dhergaa.
- Beentaada hore runtaada dambe ayay u daran tahay.
- Baryo badan iyo bukaan badanba waa laysku nacaa.
- Belaayo kaasii jeeda layskuma soo jeedsho.
- Carrab lo'aad caws looma tilmaamo.
- Daacadi ma hungowdo.
- Dani waa seeto.


**W/D Cabdinaasir Yuusuf Macalin Xuseen**

# Taxanaha Darsidda Afka iyo Suugaanta Soomaalid

Taxanahani waa silsilad dhiganeyaal cilmiyeed ay diyaariso Akadeemiya-Goboleedka Af-Soomaaligu, lana daahfurtay sannadkii 2014. Taxanahani wuxuu soo gudbiyaa waxsoosaarka cilmiyeed ee AfSoomaaliga iyo hal-abuurkiisa suugaaneed.

Taxanahan ilaa hadda waxaa soo baxay labadiisii buug ee ugu horreeyay. Buugga Koowaad waa *'Afmaal: Proceedings of the Conference on the 40th Anniversary of Somali Orthography'* oo la daabacay 2015. Buugga labaadna waa *'Haldoor:Taariikh-nololeedkii iyo Dhaxal-cilmiyeedkii Shariif Saalax Maxamed Cali (1936 – 2014)'* oo la daabacay 2018.




AGA

**Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga**
**2013-2018**
**Shan Sanno oo Horumar & Waxqabad ah**